



Jamhuuriyada Somaliland
Golaha Wakiilada JSL



Warbixinta

Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 29^{aad}

(From 28 November 2015 to 16 January 2016)

March 2016

[Waaxda Hadal Qoraalka iyo Gudiyadda | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 29^{aad}](#)

Ku:- Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL.

Ujeedo: - Warbixinta Shir-gudoonka ee kal-fadhigii 29^{aad}

Mudanayaal

Si aynu u gudano hawlaha inoo qorshaysan **kal-fadhiga 30^{aad}** ee Golaha Wakiilada oo una dardar galino, una dhameystirno hawlahii inaga baaqdey kal-fadhigii hore inagoo gudanyna Waajibaadkeena Qaran, waxaan halka idiinku soo gudbinaynaa waxqabadkii Golaha Wakiilada ee kal-fadhigii 29^{aad} oo dhamaystiran si aad u xasuusataan wax yaabihii inoo qabsoomay iyo wixii aan inoo qabsoomin.

1. Kal-fadhigii 29^{aad}

| No | Kal-fadhiga | Taariikhda uu furmay | Taariikhda uu xidhmay |
|-----------|--------------------|-----------------------------|------------------------------|
| 1. | 29 ^{aad} | 28/11/2015 | 16/16/2016 |

Kal-fadhigan oo Goluhu qabtey hawlo aad muhiimaa ay ka mid ahaayeen Ansixinta Xeerarka ay ka mid ahaayeen Xeerka Duulista Hawada, Xeerka Nidaamka Xukuumada iyo Xeerka Ilaalinta Keymaha iyo Duur-joogta iyo Ansixinta masuuliyiin Qaran iyo sidoo kale Wax qabadkii Gudiyada Golaha, halkan ayaanu ku soo bandhigeynaa Wax qabadkii Kal-fadhiga 29^{aad} oo dhameysitiran si aynu u dardargalino kal-fadhiga 30^{aad}.

2. Mashaariicda Sharci ee Goluhu ka doodey:-

| No | Magaca Xeerka | Wakhtiga Dooda |
|-----------|--------------------------------|-----------------------|
| 1. | Xeerka Ka Hortaga Kufsiga | 15 iyo 20/12/2015 |
| 2. | Miisaaniyada Qaranka ee 2016ka | 27/12/2015 |

4. Mashaariicda Sharci ee Goluhu Ansixiyey:-



| No | Mashruuc Sharciga la Ansixiyay | Taariikhda | Halka loo gudbiyay |
|----|--|------------|--------------------|
| 1. | Xeerka Ilaalinta Keymaha iyo Duur-jooqta | 07/12/2015 | Madaxweynaha |
| 2. | Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee 2016ka | 03/01/2016 | Madaxweynaha |
| 3. | Xeerka Duulista Hawada | 12/01/2016 | Madaxweynaha |

5. Ansixinta Odoroska Miisaaniyada Qaranka 2016ka:-

Waxaa Mudanayaasha Golaha loo qeybiyay 26/12/2015kii Nuqulada Buugta Odoroska Miisaaniyada 2016ka, isla markaana Wasiirka Maaliyada iyo Saraakiisha kale ee Wasaaradaas ayaa Warbixin dheer Golaha ka hor jeediyay ay kaga warbixinayaan Odoroska Miisaaniyada, korodhkeeda iyo sidey Wasaarada/Hay'ad kasta oo Dawladeeda ugu qeybsan tahay iyo sidoo kale waxyaabaha ku cusub Miisaaniyada 2016ka.



03/01/2016 ayuu Goluhu ansixiyay Odoroska Miisaaniyada Qaranaka ee Sanadka 2016ka, Miisaaniyada oo Goluhu ka dooday labdii fadhi ee u dambeeyay Waxaa Dooda Golaha ka soo baxdey oo Miisaaniyada lagu ansixiyay laba arrimood oo kala ahaa:-

- In Sida Gudidda Dhaqaaluhu soo jeedisay Miisaaniyada laga saaro Tacriifadaha Cashuuraha la kordhiyay iyo in Maxaabiista loo kordhiyo 2000 oo shilling.
- In Lacagta Saxaafada ugu jirta Miisaaniyada oo Gudidda Dhaqalaauhu soo jeedisay in laga saaro loo daayo Miisaaniyada oo aan laga saarin.

Sidoo kale Waxa Goluhu Miisaaniyada raaciyay go'aan Gole oo ka kooban 3 qodob Intaa Ka dib fadhiga oo 46 Mudane ka soo xaadireen waxaa u Codeeyay in Miisaaniyada sidaa lagu ansixyo 40 Mudane, waxaa Diiday 05 Mudane Gudoomiyuhuna muu codey, sidaasna Miisaaniyadii Qaranka 2016ka Golaha Wakiiladu ku ansixiyay.

6. Masuuliyiinta Qaranka ee Goluhu Ansixiyay:-

Intii lagu jirey Kal-fadhigan 29aad Wuxuu Goluhu Ansixiyay 14 Masuul Qaran oo isugu jira Wasiiro, Wasiiro ku-xigeeno iyo Wasiiro Dawlayaal taariikhdu markey aheyd 19/December/2015, iyadoo dhamaan Masuuliyiintaas Qaran Goluhu ku ansixiyay Cod gacan taag ah oo isku dhow.



Masuuliyiintaas Magacyadoo Xilka loo ansixiyay iyo taariikhda la ansixiyay waxay ka muuqataa shaxdan hoose:-

| No. | <u>Magaca Masuulka</u> | <u>Xilka loo ansixiyay</u> | <u>Taariikhda</u> |
|------------|---|---|--------------------------|
| 1. | Md. C/laahi Faarax Meydhane | Wasiirka Dhalinyarada, Ciyaaraha iyo Dalkxiiska | 19/12/2015 |
| 2. | Md. C/laahir Ibraahi Habne (C/laahi Dheere) | Wasiirka Waxbarashada iyo Tacliinta Sare | 19/12/2015 |

| | | | |
|-----|---|---------------------------------------|------------|
| 3. | Md. Cali Xasan Maxamed (Cali-mareexaan) | Wasiirka Hawlaha Guud iyo Gaadiidka | 19/12/2015 |
| 4. | Md. Cali Xuseen ismaaciil Jirde | Wasiirka Qorsheynta iyo Horumarka | 19/12/2015 |
| 5. | Md. Keysar C/laahi Maxamed | Wasiir ku-xigeenka Ganacsiga | 19/12/2015 |
| 6. | Md. Axmed Maxamed Ismacil (Keyse) | Wasiir ku-xigeenka Arrmaha Dibada | 19/12/2015 |
| 7. | Md.Eng. Cabdi Maxamed Hiirada | Wasiir ku-xigeenka Hawlaha Guud | 19/12/2015 |
| 8. | Md. Cisman Axmed Jama | Wasiir ku-xigeenka Cadaalada | 19/12/2015 |
| 9. | Md. Cabdi Yusuf Ismaciil | Wasiir ku-xigeenka Qorsheynta | 19/12/2015 |
| 10. | Md. Aadan C/laahi Cabdule | Wasiir ku-xigeenka Dib U-dejinta | 19/12/2015 |
| 11. | Md. Boos Mire Maxamed | Wasiir Ku-xigaanka Gaashaandhiga | 19/12/2015 |
| 12. | Eng. C/rashiid Maxamed Cali (Riyo-raac) | Wasiiru Dawlaha Xanaanada Xoolaha | 19/12/2015 |
| 13. | Md. Mahdi Cisman C/laahi (Buuri) | Wasiiru-dawlaha Caafimaadka. | 19/12/2015 |
| 14. | Md. C/raxman Axmed Ismaciil | Wasiiru-dawlaha Macdanta iyo Tamarta. | 19/12/2015 |

7. Mooshinkii Xeerka Ganacsiga Baananka:-

Waxa Golaha la keenay **10/01/2016** Mooshin ku saabsan Xeerka Ganacsiga Baananka, mooshinkaas oo Xildhibaan ay keeneen waxa Gudoomiyu sheegay in loo dhiibey Mooshinkaas wuxuuna xadiriya Xildhibaanadii keenay mooshinka si loo hubiyo inuu tiradii waafaqsan yahay wuuna buuxiyay shuruudii inta aka dib waxaa mooshinka akhriyay Md. Siciid Cilmi Rooble oo ka mid ahaa Mudanayaashii keenay mooshinka, iyadoo Xeerkaa ooh ore Goluhu uga dooday loo saarey Gudi gaar ah (Ad hoc Committee) Golaha uga soo talo bixisa, isla markaana Culimada iyo aqoon yahanka kala soo kulanta, ka dibna Warbixin Golaha kaga soo celisa.

Fadhigii xigay ayay Warbixn Golaha horkeentey Gudiddii gaarka aheyd (Ad hoc Committee) loo saarey Xeerka Ganacsiga Baananka, iyadoo Gudiddaasi keenay Warbixin ay kaga soo tala bixiyeen Xeerkaas ka dib marki ay la kulmeen Culimada, isla markaana soo naaqisheen Xeerkaa, iyagoo Golaha u soo jeediyay in Xeerkaas uu ka soo horjeedo shareecada Islaamka iyo Dastuurka oo uu jideynayo Ribbo, intaa ka dib waxaa muran iyo dood ka dhalatey Warbixintaas, khilaafkaas oo Mudanayaasha u kala qeybiyay laba qeybood oo ku kala doodaya in Xeerka loo baahan yahay oo si deg-dega loo ansixiyo iyo qeyb ku doodeysa sida Gudidda gaarka ahi soo jeedisey in Xeerku jideynayo ribo oo aan Xeerka Goluhu

ansixin, intaa ka dibna Kal-fadhigii 29^{aad} ayaa xidhmay Goluhuna fasixii ayuu sidaa ku galey.

8. Xeerarka Gudiyadu Gacanta ku hayaan:-

| No. | Magaca Xeerka Golaha wali horyaal | Gudidda Gacanta Ku heysa |
|------------|--|---|
| 1. | Xeerka Midaynta Cashuuraha | Gudidda Dhaqaalaha |
| 2. | Xeerka Caymiska Qaranka | Gudidda Dhaqaalaha |
| 3. | Xeerka Low of Establishment of Somaliland Agency | Gudidda Dhaqaalaha |
| 4. | Xeerka Miisaaniyada Qaranka | Gudidda Dhaqaalaha |
| 5. | Xeerka Katamada | Gudidda Dhaqaalaha |
| 6. | Xeerka Cashuuraha Bariga | Gudidda Dhaqaalaha |
| 7. | Xeerka Qandaraasyada | Gudidda Ilaalinta Iyo Dabagalka Hantida Qaranka |
| 8. | Xeerka Hantidhowrka Qaranka | Gudidda Ilaalinta Iyo Dabagalka Hantida Qaranka |
| 9. | Xeerka Shaqaalaha Dawladaha Hoose | Gudidda Arrimaha Bulshada |
| 10. | Xeerka Saxaafada | Gudidda Arrimaha Bulshada |
| 11. | Xeerka Ciyaraha | Gudidda Arrimaha Bulshada |
| 12. | Xeerka ka hortaga Argagixisada | Gudidda Arrimaha Gudaha |
| 13. | Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada | Gudidda Arrimaha Gudaha |
| 14. | Wax-ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Ciqaabta guud | Gudidda Garsoorka iyo Cadaalada |
| 15. | Xeerka Kufsiga iyo dambiyada Galmada (rape bill) | Gudidda Garsoorka iyo Cadaalada |
| 16. | Xeerka Hay'adda Wadooyinka | Gudidda Hawlaha Guud |
| 17. | Xeerka Shirkadaha | Gudidda Dhaqaalaha |
| 18. | Xeerka Xawaaladaha | Gudidda Dhaqaalaha |

9. Waxqabadka Guddi Hoosaadyada Golaha Wakiilada.

Gudidda Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka

Waxay **26-28 December** Gudiddu kulan Wadaag(Workshop) u qabatey Xeerka Hay'adda Hanti-dhowrka Guud oo Gudiddu gacanta ku heyso, kulankaas oo socdey saddex cisho waxaa ka soo qeybgaley Gudidda Qandaraasyada, Wasaarada

Maaliyada, Hay'addo badan oo Dawlada ah, Ardeyda Jaamacaha iyo qeybaha kala duwan ee bulshada, waxay saddex cisho aad loogu falanqeeyay Xeerkaas iyadoo ka soo qeyb-galayaashu xeerka ku sameeyeen Wax ka badal badan ku sameeyeen sida qodobo ay ka saareen, kuwo cusub oo ay ku soo kordhiyeen iyo qodobo ay wax ka badal ku sameeyeen.

Sidoo kale **29-31 December 2015** waxay Gudiddu kulan Wadaag labaad (Workshop) isna u qabatey Xeerka Qandaraasyada oo Gudiddu gacanta ku heyso, kulankaas oo socdey saddex cisho waxaa ka soo qeybgaley Gudidda Qandaraasyada, Wasaarada Maaliyada, Hay'addo badan oo Dawlada ah, Ardeyda Jaamacaha iyo qeybaha kala duwan ee bulshada, waxay saddex cisho aad loogu falanqeeyay Xeerkaas iyadoo ka soo qeyb-galayaashu xeerka ku sameeyeen Wax ka badal badan ku sameeyeen sida qodobo ay ka saareen, kuwo cusub oo ay ku soo kordhiyeen iyo qodobo ay wax ka badal ku sameeyeen.

Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada

Gudiddu iyadoo ka duuleysa Waajibaadka Xeer-hoosaadka Goluhu faray Waxay Golaha uga soo talo-bixisey Wasiir ku-xigeen Madaxweynuhu u magacaabey Wasaarada Ganacsiga in Xilka Madaxweynuhu u magacaabey Goleweynuhu u ansixiyo, Wasiir ku-xigeenkaas oo ah **Md. Keysar C/laahi Maxamed**.

09-18 January 2016 waxay Gudiddu kulamo (Workshop) lagu falanqeynayay Xeerarka PFM Bills-ka oo kala ah Xeerka Dakhliga (Revenue Bill), Xeerka Cashuuraha Bariga (Custom Bill) iyo Xeerka Maareynta Nidaamka Maaliyadaha (Financial Management Bill), iyadoo Xeerkaas saddex cisho kulankiisu (Workshop) uu socdey, kulamadaas oo ay ka soo qeyb-galeen Maamulka Kastamada kala duwan ee dalka, Hay'addaha Dakhli soo saarayaasha, Wasaarada Maaliyada, Hay'addo badan oo Dawlada ah, Ardeyda Jaamacaha iyo qeybaha kala duwan ee bulshada, waxay ka soo qeyb-galayaashu sagaalka cisho aad ugu falanqeeyay Xeerkaas iyagoo xeer kasta ku sameeyay Wax ka badal badan ku sameeyeen sida qodobo ay ka saareen, kuwo cusub oo ay ku soo kordhiyeen iyo qodobo ay wax ka badal ku sameeyeen.

Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta

Bishii December 2015 Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diintu iyadoo ka duuleysa Waajibaadka Xeer-hoosaadka Goluhu faray Waxay Golaha uga soo talo-bixisey Masuuliyiin Qaran in Xilalka Madaxweynuhu u Magacaabey Goluhu u ansixiyo Masuuliyiintaas oo loo Magacaabey Wasaaradaha iyo Hay'addaha Gudiddu shaqa wadaagta la leedahey, waxaana ka mid ahaa Masuuliyiinta Gudidda Golaha uga soo talo-bixisey:-

- Md. C/laahi Faarax Meydhane Wasiirka Dhalinyarada, Ciyaaraha iyo Dalkxiiska

- Md. C/laahir Ibraahi Habne (C/laahi Dheere) Wasiirka Waxbarashada iyo Tacliinta Sare iyo
- Md. Mahdi Cisman C/laahi (Buuri) Wasiiru-dawlaha Caafimaadka.

08/12/2015 waxay Gudiddu Golaha ka hor akhridey Warbixin ku saabsan Kormeer ay Gudiddu ku tagtey Gobolka Tog-dheer, Warbixintaas oo uu gudidda u jeediyay Gudoomiyaha Gudidda Md. Xasan Cawaale Caynaan, wuxuu ka warbixiyay kormeerkaas oo ku booqdeen Goobaha Waxbarashada Gobolka sida Jaamacadaha, Iskuulada Dawliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay, iyadoo Gudiddu u kuurgashey Xaalada Waxbarasho ee Gobolka waxayna Gudiddu sheegtey inay Kulamo la yeesheen Gudoomiyaha Waxbarashada Gobolka iyo Maamulayaasha kale ee Xarumaha kala duwan ee Waxbarashada.

Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga

December 2015 Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga iyadoo ka duuleysa Waajibaadka Xeer-hoosaadka Goluhu faray Waxay Golaha uga soo talo-bixisey laba Wasiiru Dawle in Xilalka Madaxweynuhu u Magacaabey Goluhu u ansixiyo Labada Wasiiru Dawle oo loo Magacaabey Wasaarada Xanaanada Xoolaha iyo Wasaarada Macdanta iyo Tamarta, Waxayna kala ahaayeen:-

- Eng. C/rashiid Maxamed Cali (Riyo-raac) Wasiiru Dawlaha Xanaanada Xoolaha
- Md. C/raxman Axmed Ismaciil Wasiiru-dawlaha Macdanta iyo Tamarta.

08/12/2015 Waxay Gudiddu Warbixin ka akhridey Goleweynaha, warbixintaas oo u jeedeedu aheyd Kormeer ay Gudiddu tagtey Gobolka Awdal, Gudoomiyaha Gudidda Md. Siciid Warsame Ismaciil oo Warbixintaas Golaha ka hor jeediyay wuxuu sheegay inay kormeereen Goobo badan oo Gobolka Awdal ah sida Wakaalada Biyaha Magaalada.

Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyada

December 2015 Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyadu iyadoo ka duuleysa Waajibaadka Xeer-hoosaadka Goluhu faray Waxay Golaha uga soo talo-bixisey Wasiiro ku-xigeenada kala ah **Md. Aadan C/laahi Cabdulle Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Dib u-dejinta iyo Md. Boos Mire Maxamed Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Gaashaandhiga** ka dib markey gudiddu ku qanacdey in Xilalka Madaxweynuhu u magacaabey hanan karaan.

08/12/2015 Waxay Warbixin ka akhridey Goleweynaha, warbixintaas oo u jeedadeedu tahey.

Gudidda Garsoorka, Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka

December 2015 Gudidda Garsoorka, Cadaalada iyo X. Insaanku iyadoo ka duuleysa Waajibaadka Xeer-hoosaadka Goluhu faray Waxay Golaha uga soo talo-bixisey Wasiir ku-xigeen Madaxweynuhu u magacaabey Wasaarada Cadaalada in Xilka Madaxweynuhu u magacaabey Goleweynuhu u ansixiyo ka dib markey gudiddu ku qanacdey inuu Xilkaa hanan karo **Md. Cisman Axmed Jama Wasiir ku-xigeenka Wasaarad Cadaalada iyo Garsoorka.**

14/12/2015 Waxay Warbixin ka akhridey Goleweynaha, warbixintaas oo u jeedadeeduahayd kormeer ay ku tagtey Gobolka Saaxil gaar ahaan Magaala Madaxda Gobolka ee Berbera, waxayna Goleweynaha Warbixin ka siiyeen ujeedadii kormeerkaas iyo wixii uga soo qabsoomey.

Gudidda Arr. Dibada, Is. Caalamiga ah iyo Qorsheynta Qaranka

December 2015 Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashiga Caalamiga ah iyo Qorsheynta Qaranka iyadoo ka duuleysa Waajibaadka Xeer-hoosaadka Goluhu faray Waxay Golaha uga soo talo-bixisey Masuuliyiin Qaran in Xilalka Madaxweynuhu u Magacaabey Goluhu u ansixiyo Masuuliyiintaas oo loo Magacaabey Wasaaradaha iyo Hay'addaha Gudiddu shaqa wadaagta la leedahey, waxaana ka mid ahaa Masuuliyiinta Gudidda Golaha uga soo talo-bixisey:-

- Md. Cali Xuseen ismaaciil Jirde Wasiirka Wasaarada Qorsheynta iyo Horumarka Qaranka.
- Md. Axmed Maxamed Ismacil (Keyse) Wasiir Ku-xigeenka Wasaarada Arrimaha Dibada.
- Md. Cabdi Yusuf Ismaciil Wasiir Ku-xigeenka Wasaarada Qorsheynta iyo Horumarka.

Gudidda Hawlaha Guud iyo Gaadiidka

December 2015 Gudidda Hawlaha Guud iyo Gaadiidku iyadoo ka duuleysa Waajibaadka Xeer-hoosaadka Goluhu faray Waxay Golaha uga soo talo-bixisey in Xilka Madaxweynuhu u magacaabey Goleynuhu u ansixiyo ka dib markii ay la kulmeen isla markaana ku qanceen inay xilkaa hanan karaan Masuuliyiinta kala ah:-

- Md. Cali Xasan Maxamed (Cali-mareexaan) Wasiirka Hawlaha Guud iyo Gaadiidka
- Md.Eng. Cabdi Maxamed Hiirada Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Hawlaha Guud iyo Gaadiidka.

10. Aqoon korodhsiyo, Workshops iyo Seminars-ka:-

08/02/2016 Waxaa Mudanayaasha iyo Shaqaalaha Golaha loo qabtey aqoon korodhsi ku saabsan sida Shuruucda loo sameeyo, heerarka ay maraan iyo sida wax ka badal iyo kaabis loogu sameeyo, aqoon korodhsigaas waxaa furey Gudoomiye ku-xigeenka laad ee Golaha Wakiilada **Md. Baashe Maxamed Faarax** wuxuuna ka Hadley muhiimada iyo faa'idada aqoon korodhsiga oo ay hirgalisey Hay'adda UNDP oo Golaha la shaqeysa waxaa bixinayay casharada aqoon korodhsiga Khabiir ka socday Hay'adda UNDP, Wuxuuna socdey saddex cisho.

11. Kormeerada:-

17-22/01/2016 Waxaa Kormeer ugu kala baxay Mudanayaasha laga soo kala doorto Gobolada Tog-dheer, Sanaag iyo Sool, iyadoo Gobolkasta dhamaan Mudanayasha laga soo doortey ay ugu baxeen sidii ay xog ogaal ugu noqon lahaayeen Xaalada guud ee dhinac kasta sida Xaalada nololeed, xaalada Nabadgalyo, xaalada Maamul iyo xaaladaha Abaaraha ee Wakhtigan Gobolada ka jira sidye Bulshada guud ahaan Maal iyo moolba u saamesay.

Xildhibaanada saddexdaa Gobol oo tiradoodu aheyd 39 Mudane waxay u kala baxeen Gobolka Tog-dheer oo laga soo doortey 15 Mudane, Gobolka Sanaag iyo Sool oo midkiiba laga soo doortey 12 Mudane, Waxayna Mudanayaashu kulamo la yeesheen Qeybaha kala duwan ee bulshada oo ay wax iska weydiiyeen Xaaladaha Gobolada, isla markaan bulshada Gobol kasta ku dhaqan waxay su'aalo ka weydiiyeen Mudanayaasha siday u guteen Waajibaadkii loo doortey gaar ahaa dadkii soo doortey oo matalayeen iyo waxay bulshada ku soo celiyeen ama u qabteen.



Sidoo kale Mudanayaasha Gobolkasta waxay kormeer ku soo sameeyeen, Deegaanada Gobol kasta iyo xarumaha bulshada loogu shaqeeyo sida Cisbitaalada ama xarumaha Caafimaadka, Xarumaha Waxbarashada, xarumaha

Maamulada iyo Jeelasha iy saldhigyada maxaabiista, iyagoo meelkasta oo ay booqdaan u kuurgalayay Xaaladaha iyo baahiyaha ka taagan.

Waxayna Xildhibaanada Gobol kasta Warbixin ka soo diyaariyeen Waxyaabahey la kulmeen iyo sidii wax ugu qabsoomeen waxayna warbixintaas ka horjeedinayaan Goleweynuhu markuu furmo Kal-fadhigan 30^{aad}.

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.
